YouScreen

Cervical Screening Made Easier

# Buugyaraha Macluumaadka Kaqeybgalayaasha

Waxaan kugu martiqaadeynaa inaad kaqeybqaadato daraasad kusaabsan qalabyada iska qaadista muunada baaritaanka xubinta taranka dumarka (YouScreen). Kahor intaadan go'aansan kaqeybqaadashada, waxaa muhiim kuu ah inaad fahanto waxa uu yahay qalabka 'YouScreen' iyo waxa kaqeybqaadashadu ay kaaga dhigan tahay.

Waqti ku qaado si aad si taxaddar leh u akhriao buug-yarahan oo nala soo xiriir haddii aad wax su'aalo ah qabtid ama haddii ay jiraan wax aan caddayn.

## Qodobada muhiimka ah

### Kumaa loogu talagalay?

✔ Haweenka iyo dadka qaba xubinta taranka dumarka kuwaas oo waqtigoodii ku dhacay ama dhaafay waqtigii baaritaanka xubinta taranka dumarka

### Waa maxay?

✔ Daraasad bixinaysa qalabka iska qaadista muunada baaritaanka xubinta taranka dumarka

✔ Waxaad iskaa iskaga qaadi kartaa muunada baaritaanka xubinta taranka dumarka:
- si gaar ah / guriga adigoo jooga
- si raaxo leh (dumarka badankood waxay u arkaan inaanu gebi ahaanba xanuun lahayn)
- baaritaan la'aan ama ballan la'aan
- oo ku soo celi boostada (shaabad looma baahna)

Qalabka YouScreen waxay suuf muunada uga soo qaadaysaa xubinta taranka dumarka si looga baaro (Fayras ku dhaca xubinta taranka dumarka oo sababi kara kansar) Human papillomavirus (HPV). Macluumaad badan oo ku saabsan HPV ayaa ku jira buugyarahan.

Dumarka badankood ma yeelan doonaan HPV. Hase yeeshe, haddii aan HPV ka helno muunadaada, waxaad u baahan doontaa in muunad/sambal kale uu kaa qaado dhakhtar ama kalkaaliye caafimaad. Tani waxaa loogu talagalay in laga hubiyo haddii ay jiraan unugyada xubinta taranka dumarka oo aan caadiga ahayn. Unugyada aan caadiga ahayn waxay isku beddeli karaan kansarka xubinta taranka dumarka haddii aan la daaweyn.

## Waa maxay daraasadda YouScreen?

YouScreen waa daraasad cilmi baaris ah. Waxay ku martiqaadi doontaa 31,000 oo haween ah iyo dadka qaba xubinta taranka dumarka ee jooga Waqooyiga iyo Bariga London si ay iska qaadaan muunada baaritaanka xubinta taranka dumarka. London ayaa ah meesha ugu hooseysa ee lagu sameeyo baaritaanka xubinta taranka dumarka ee England. Haweenka aan sida joogtada ah ugu imaan baaritaanka xubinta taranka dumarka waxay u badan yihiin inuu ku dhaco kansarka marinka ilmo-galeenka ku dhaca. Waxaan rajeyneynaa in qeybinta/bixinta qalabka iska qaadida muunada ee YouScreen ay sahli doonto baaritaanka xubinta taranka dumarka ayna ka caawin doonto dumar badan inay sameeyaan baaritaanka.

Waxaan qalabka YouScreen kugu siineynaa laba siyaabood oo kala duwan: boostada ama xarunta GP-gaaga.

## Maxay tahay sababta aan kuugu martiqaadeyno daraasadda?

Waxaad ku nooshahay aag aan qalabyada YouScreen ugu qeybinayno dumarka dhaafay waqtigooda baaritaanka xubinta taranka dumarka, taasoo qeyb ka ah daraasad. Dumar, waxaan ula jeednaa qof kasta oo qaba xubinta taranka dumarka - ragga laba jinsiyoodka ah ee qaba xubinta taranka dumarka ayaa iyagana u qalma. Qalabyada YouScreen ayaa laga heli karaa oo keliya Waqooyiga iyo Bariga London. GP-gaaga ayaa iska diiwaangaliyay daraasada.

## Waa maxay qalabka YouScreen?

Qalabka YouScreen ayaa kuu oggolaaneya inaad iska qaadid muunada baaritaanka xubinta taranka dumarka adiga oo isticmaalaya suufka xubinta taranka haweenka (sida suuf cudbi dheer leh). Waa bilaash, fudud in la isticmaalo waxaana lagu sameyn karaa waqti iyo goob adiga kugu habboon. Uma baahnid ballan ama baaritaan. Haweenka badankood waxay u arkaan mid raaxo leh oo xanuun la’aan ah.

Markaad shaybaarka ku soo celiso muunada, waxay ka baari doonaan Human papillomavirus (HPV) oo ah fayras ku dhaca xubinta taranka dumarka oo sababi kara kansar.

## Waa maxay HPV?

Human papillomavirus (HPV) waa fayras caan ah. Dadka badankood wuxuu ku dhacaa waqti uun ka mid ah noloshooda. Nidaamka difaaca jirkaaga ayaa sida caadiga ah ka takhalusi kara fayraska adigoon weligaa ogaanin inaad qabtey fayraska. Laakiin mararka qaarkood HPV wuxuu sababi karaa unugyada xubinta taranka dumarka inay noqdaan kuwo aan caadi ahayn. Badanaa, jirkaagu wuu ka takhalusi karaa unugyada aan caadiga ahayn ee ku samaysma xubinta taranka dumarka, xubintaadana waxay ku soo noqoneysaa sida caadiga ah. Laakiin haddii arrintan aysan dhicin, unugyada aan caadiga ahayn waxay isku bedeli karaan kansar. Waxaad macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan HPV iyo baaritaanka xubinta taranka dumarka ka heli kartaa halkan:
www.gov.uk/phe/cervical-screening-leaflet

## Maxaan sameeyaa haddii aan go'aansado inaan kaqaybqaato?

Haddii aad go'aansato inaad ka qaybqaadato, waxaad u baahan doontaa inaad:

1. Raacdo tilmaamaha qalabka 'YouScreen' si aad muunad iskaga qaado
2. Ku qor taariikhda aad muunadaada iska qaaday tubbada muunada
3. Ku buuxi dhammaan faahfaahinta foomka oggolaanshaha codsiga shaybaarka
4. Isticmaal baqshadda boostada ee bilaashka ah si aad muunada iyo foomka oggolaanshaha ugu dirtid shaybaarka. Fadlan sidaas ku samee shan maalmood gudahood laga bilaabo maalinta qaaditaanka muunada.

**Xusuusnow inaad buuxiso oo aad u soo dirto foomka oggolaanshaha shaybaarkaaga iyo muunadaada YouScreen**

Haddii aad kaqeybqaadato, waxaad dooran doontaa in lagaa qaado muunada baaritaanka xubinta taranka dumarka. Tani waxay ka dhigan tahay haddii baaritaanka lagaaga waayo cudurka HPV (oo aan la helin HPV), waxaa lagugu martiqaadi doonaa baaritaankaaga xiga ee xubinta taranka dumarka muddo 3 ama 5 sano gudaheed (iyadoo ku xiran da'daada).

Markaad soo celiso muunadaada, waxaad u oggolaaneysaa kooxda daraasadda inay xogta adiga kugu saabsan ka uruuriyaan shaybaarka. Xog uruurintan waxaa ku jiri

doona natiijadaada muunada iyo natiijooyinka baaritaanka xubinta taranka dumarka ee ku xiga. Shaybaarka ayaa sidoo kale na siin doona macluumaad ku saabsan diiwaanka isbitaalka haddii aad u tagto isbitaalka deegaankaaga si aad u hesho baaritaanno dheeri ah oo lagu sameeynayo xubintaada daranka. Markaad soo celiso muunadan, waxaad sidoo kale noo oggolaanaysaa inaanu waydiino xarunta diiwaanka kansarka qaranka wixii macluumaad ah ee la xiriira baadhitaanada qof kasta oo soo celiyo muunada 3 iyo 6 sano ka dib dhamaadka daraasada.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan sida macluumaadkaaga loo isticmaali doono, fadlan eeg bogga 11 ee 'sidee ayaad u isticmaali doontaa macluumaadka aniga igu saabsan oo aad uruurisey'.

Waxaan qiimeyn doonnaa aragtidaada ku aadan muunad iska qaadida iyo baaritaanka xubinta taranka dumarka. Waxaan qalabka kuugu soo lifaaqnay foomka su'aalaha. Haddii aad soo celiso foomka su'aalaha, waxaan jawaabahaaga ku xiriirn doonaa macluumaadka ku habboon ee laga helo diiwaankaaga caafimaad. Foomka su'aaluhu waa ikhtiyaari. Muunadaada ayaa weli laga baari doonaa HPV haddii aadan soo celin foomka.

Waxaan sidoo kale jeclaan lahayn inaad noo oggolaato inaan haraagaaga muunadaada YouScreen u keydsano baaritaanada mustaqbalka (eeg 'Maxaa ku dhici doona muunada aan bixiyo?' ee ku taal bogga 9). Tani waa ikhtiyaari. Haddii aadan oggolaansho ka bixinin, muunadaada weli waxaa laga baarayaa HPV.

## Waxaan leeyahay uur, ma isticmaali karaa qalabka YouScreen?

Haddii aad uur leedahay ama aad u maleynaysid inaad uur yeelan doontid, fadlan ha isticmaalin qalabka 'YouScreen kit'. Waxaan kula talinaynaa haweenka uurka leh inay sugaan 12 toddobaad ka dib dhalashada ilmahaaga si loogu sameeyo baaritaanka xubinta taranka dumarka.

Haddii aad wax su'aalo ah qabtid, la hadal GP-gaaga.

## Muunada shakhsiga uu iska qaado ma waxay u fiican tahay sidii muunada uu kaa qaado dhakhtar ama kalkaaliye caafimaad?

Muunad uu qaado dhakhtar ama kalkaaliye caafimaad ayaa waxtar badan leh. Si kastaba ha noqotee, iska qaadida muunaada waa ikhtiyaar aad u wanaagsan haddii aadan rabin in muunada baaritaanka xubinta taranka dumarka uu kaa qaado dhakhtar ama kalkaaliye caafimaad. Muunada iska qaadidda ayaa durba si joogto ah looga isticmaalaa waddamo kale.

## Ma ihi dhakhtar ama kalkaaliye caafimaad - si sax ah ma u qaadi karaa muunada?

Cilmi baaris ayaa muujisay in 100kii dumarba 99 ka mid ah ay si sax ah iskaga qaadi karaan muunada. Muunada iska qaadista ayaa ka duwan baaritaanka xubinta taranka dumarka ee xilliyadii hore la samayn jirey. Uma baahnid inaad meel fog ka gaadho.

xubinta tarankaaga. HPV waa fayras sidaa darteed waxaa laga heli doonaa dhamaan aaggaga xubinta tarankaaga. Waxaan ku soo darnay tilmaamo buuxa oo ku saabsan sida loo isticmaalo qalabka. Waxaad macluumaad dheeri ah oo ku saabsan muunada is-qaadista iyo fiidiyaha YouScreen ka heli kartaa: www.smallc.org.uk/youscreen

## Sideen ku heli karaa natiijooyinka baaritaanka qalabka YouScreen?

Ka dib markaad qalabkaaga YouScreen boostada ugu soo dirtid shaybaarka waxaan dooneynaa inaan kuugu soo dirno baastada natiijooyinkaaga 14 maalmood gudahood. Waxaan sidoo kale nuqul u diri doonnaa GP-gaaga.

## Natiijooyinka baaritaanka qalabka YouScreen

Waxaa jira 3 natiijo oo suurtagal ah oo laga heli karo qalabka YouScreen:

### 1. Lama helin HPV (HPV la waayay)

Haweenka badankood waxaa laga helaa HPV. Haddii aan la helin HPV, uma baahnid inaad wax dheeraad ah sameyso. Waxaad la socon doontaa baaritaanka xubintaada taranka. Barnaamijka Baaritaanka Xubinta Taranka Dumarka ee NHS ayaa kugu martigelin doona baaritaankaaga xiga 3 ama 5 sano gudahood (iyadoo kuxiran da'daada).

### 2. HPV la heley (HPV togan)

Haddii aan HPV ka helno muunadaada, waxaan kugula talin doonnaa inaad ballan ka qabsato dhakhtarka ama kalkaaliyaha caafimaad si laguugu sameeyo baaritaan dabagal ah oo dhanka xubinta taranka ah. Haddii aadan aadin, GP-gaaga ama Barnaamijka Baaritaanka Xubinta Taranka Dumarka ee NHS ayaa kuula soo xiriiri kara martgelino dheeraad ah.

**Hay'adda Kansarka ku dhaca Xubinta Taranka Dumarka ee Jo (Jo's Cervical Cancer Trust) waxay bixisaa talooyin, taageero iyo macluumaad ku saabsan HPV iyo baaritaanka xubinta taranka dumarka. Tani waxay si gaar ah kuu caawin kartaa haddii aad dareento inaadan awoodin inaad u tagto GP-gaaga. Khadkooda caawinta ayaa si buuxda qarsoodi u ah, mana jirto su'aal ku weyn ama yar:**
**0808 801 0408**

### 3. Natiijo aan la heli karin

Haddii natiijadaadu ay tahay mid aan ku filnayn ama aan la heli karin, waxaan ku weydiin doonnaa inaad ku celiso iska qaadista muunada. Waxaan boostada kuugu soo diri doonaa qalab kale dhowr toddobaad gudahood.

Baaritaanka wuxuu noqon kartaa mid aan ku filnayn ama aan la heli karin maxaa yeelay:

- shaybaarku ma uusan hel karin natiijada baaritaanka HPV ee muunadaada
- waxaa jira macluumaad ka maqan tuubada muunada ama foomka ogolaanshaha shaybaarka
- muunada ma aysan soo gaarin shaybaarka wakhtigii loogu talagalay

## Ma khasab baa inaan kaqaybqaato?

Adigaa iska leh inaad go'aansato inaad rabto inaad kaqaybqaadato iyo inkale. Haddii aad soo dirto muunad, waxaan u qaadaneynaa inaad rabto inaad kaqeybqaadato sidaas darteedna waxaad ogolaatay in lagaa qaado muunada baaritaanka xubinta taranka dumarka. Tani waxay ka dhigan tahay haddii baaritaanka lagaaga waayo cudurka HPV (oo aan la helin HPV), waxaa lagugu martiqaadi doonaa baaritaankaaga xiga ee xubinta taranka dumarka muddo 3 ama 5 sano gudaheed (iyadoo ku xiran da'daada).

Haddii aad ka qayb qaadato oo aad goor dambe maskaxdaada beddesho, waxaad xor u tahay inaad la baxdo wakhti kasta, adigoon wax sabab ah na siinin. Tani ma saameyn doonto daryeelkaaga mustaqbalka aad ka heli doono NHS. Waxaad ku sii jiri doontaa Barnaamijka Baaritaanka Xubinta Taranka Dumarka ee NHS.

**Haddii aadan rabin inaad ka qaybqaadato, markaa ha soo celin muunada.**

## Haddii aanan rabin inaan iska qaado muunada, sidee kale ayaan u heli karaa baaritaanka xubinta taranka dumarka?

Waxaad ka ballansan kartaa GP-gaaga si laguugu sameeyo baaritaanka xubinta taranka dumarka. Baaritaanka waxaa qaadaya dhakhtar ama kalkaaliye caafimaad. Rugtaada caafimaadka ee dhanka galmada ee deegaankaaga ayaa sidoo kale laga yaabaa inay bixiyaan baaritaanka xubinta taranka dumarka. Haddii aad wax walaac ah ka qabtid baaritaanka xubinta taranka dumarka waxaad la hadli kartaa GP-gaaga ama kalkaaliyaha caafimaad. Haddii aad go'aansato in GP-gaaga uu kugu sameeyo baaritaanka xubinta taranka dumarka, xusuusnow inaad weydiisan kartid dhakhtarka ama kalkaaliye caafimaad oo dumar ah inay kaa qaado baaritaanka. Adiga ayaa go'aankeeda leh ballantaada baaritaanka waxaadna codsan kartaa in la joojiyo wakhti kasta.

## Waa maxay faa'iidooyinka suurtogalka ah ee laga heli karo kaqeybgalka daraasadda?

Haweenka qaarkood way ku adagtahay inay ballan ka qabsadaan baaritaanka xubinta taranka dumarka maxaa yeelay way mashquulsan yihiin ama GP-gooda ayaa aad u mashquulsan. Haweenka qaarkood waxaa laga yaabaa inay raaxo darro ama ceeb u arkaan in baaritaanka uu ka qaado dhakhtar ama kalkaaliye caafimaad. Haddii aad kaqeybqaadato daraasaddan, waxaad awood u yeelan doontaa inaad iskaa iskaga qaado baaritaanka xubinta taranka dumarka. Uma baahan doontid ballan ama baaritaan.

Daraasadaha kale, dumarka qaarkood oo aan samayn jirin baaritaanka joogtada ah ee xubinta taranka dumarka isla markaana iska qaaday muunad ayaa la ogaaday inay leeyihiin unugyada aan caadiga ahayn ee ku dhaca xubinta taranka dumarka waxaana loo daaweeyey si guul leh.

## Maxay yihiin halista ka imaan karta qalabka iska qaadista muunada baaritaanka xubinta taranka dumarka?

Waxa jirta fursad aad u yar oo ah in suufku jabo inta aad qaadaysid muunada. Si kastaba ha noqotee, arrintani aad uma badna marka laga reebo haddii aad xoog xad dhaaf ah u isticmaasho suufka. Cidina ma soo sheegin arrintan inay ka dhacday mid ka mid ah daraasadihii hore. Haddii ay dhacdo in suufku jabo, si tartiib ah uga soo saar. Waxaad la xiriiri kartaa xaruntaada GP-ga si aad u weydiisato qalab cusub.

Haweenka iskood iskaga qaaday muunad daraasaddeenii hore ma soo sheegin wax dhibaato ah. Waxay u arkeen baaritaanka mid sahlan oo ku habboon in la sameeyo.

**Ma jiro baaritaan 100% fiican. Infekshanka HPV mararka qaarkood waa la seegi karaa ('waxaa soo bixi karta natiijo been oo sheegeysa inaadan qabin cudurka').**

**Waa muhiim inaad si dhakhso leh u aragto GP-gaaga haddii aad qabto wax astaamo ah oo aan caadiyan isku arki jirin, gaar ahaan dhiig-baxa inta u dhexeysa caadada, galmada ka dib ama caadada ka dib, ama isbeddelada dheecaanka ka yimaada xubinta taranka.**

Waa muhiim inaad fahanto halista iyo faa'iidooyinka suurtogalka ah ee baaritaanka xubinta taranka dumarka. Waxaad macluumaad dheeraad ah ka heli kartaa halkan:
www.gov.uk/phe/cervical-screening-leaflet.

## Maxaa ku dhici doona muunadda aan bixiyo?

Markii shaybaarku baaritaan ku sameeyo muunadaada oo natiijadaada lagu kaydiyo keydka macluumaadka ee NHS, waxay macluumaadka lagugu aqoonsan karo ka saari doonaan wixii muunad ah ee soo haray.

Haddii aad oggolaansho bixiso adiga oo magacaaga ku qoraya sanduuqa foomka oggolaanshaha shaybaarkaaga, shaybaarku wuxuu keydsan doonaa muunadii hartay waxayna u diri doonaan bangiga cilmi baarista unugyada ee Guy's iyo St Thomas 'NHS Trust si loo keydiyo ilaa abadan. Baaritaanada anshax ahaan la oggol yahay ee la xiriira HPV ayaa la samayn karaa iyadoo la isticmaalayo muunada kaa soo hartay, taas oo gacan ka geysan karta hagaajinta baaritaanada xubinta taranka dumarka ee la samayn doono mustaqbalka. Baaritaan kasta oo mustaqbalka lagu sameeyo muunadaada saameyn kuma yeelan doonto adiga ama daryeelkaaga caafimaad.

Haddii aadan rabin in la keydiyo wixii muunadaada ah ee soo hara, ha ku qorin magacaaga sanduuqa ku sawiran foomka oggolaanshaha shaybaarka. Haddii aadan sanduuqan ku qorin xarfaha hore ee magacaaga, shaqaalaha shaybaarka ayaa baabi'in doona muunadaada mar haddii ay ka baaraan HPV.

## Maxaan ka baran doonaa daraasaddan?

Waxaan ogaan doonnaa in haddii la bixiyo qalabyada YouScreen ay gacan ka geysan karto kordhinta tirada haweenka ah ee baaritaanka lagu sameynayo si loo yareeyo halista kansarka xubinta taranka ee ku dhici kara dumarka.

Muunad iska qaadista ayaa durba la dhaqan geliyey iyadoo qeyb ka ah baaritaanka xubinta taranka dumarka ee waddamada kale. Daraasadani waxaa lagu ogaan doonaa haddii bixinta qalabka iska qaadista muunada ay sidoo kale England ka shaqeyso.

Waxaan sidoo kale dooneynaa inaan ogaano haddii haweenku u imaan doonaan baaritaanada dabagalka ah haddii HPV laga helo muunada ay iska soo qaadeen.

**Waxaan rabnaa inaan maqalno aragtidaada ku aadan baaritaanka xubinta taranka dumarka iyo iska qaadista muunada. Waxaan qalabka kuu soo raacinay foomka su'aalaha.**

**Waan soo dhaweyneynaa aragtidaada xitaa haddii aad dooratid inaadan isticmaalin qalabka. Foomka su'aalaha soo celintiisa wax lacag ah kaagama baxayso.**

## Dhakhtarkayga GP ma ogaan doonaa inaan ka qayb qaadanayo?

Haa, GP-gaaga ayaa iska diiwaangaliyay daraasada waana sababtaas sababta laguguugu casuumay inaad uga kaqeybqaadato.

## Maxaa dhacaya haddii aan soo diro muunaddayda markay daraasaddu dhammaato ka dib?

Haddii aad soo celiso qalabkaaga 'YouScreen' ka dib markay daraasaddu dhammaato, waxaa laga yaabaa inaan la baarin. Fadlan soo qaado muunadahaaga sida ugu dhakhsaha badan uguna soo celi 5 maalmood gudahood markaad buuxiso qalabka.

## Ka waran haddii aan rabo inaan ka baxo daraasadda?

Waad joojin kartaa ka mid ahaanshahaaga daraasadda 'YouScreen' wakhti kasta, laakiin waxaan sii haysan doonnaa macluumaadka adiga kugu saabsan ee aan horay u haysannay.

Haddii aad dooratid inaad joojiso kaqaybqaadashada daraasadda, waxaan jeclaan lahayn inaan sii wadno inaan macluumaadka ku saabsan caafimaadkaaga aan ka soo uruurino diiwaanka GP-gaaga iyo keydka Baaritaanka Xubinta Taranka Dumarka ee NHS. Haddii aadan rabin inay taasi dhacdo, fadlan noo soo sheeg adigoo la xiriiraya kooxda daraasadda adigoo isticmaalaya faahfaahinta xiriirka ee ku yaala bogga 14.

**Haddii aad go'aansato inaad ka baxdo daraasadda, waxaad weli casuumaadyo ka heli doontaa Barnaamijka Baaritaanka Xubinta Taranka Dumarka ee NHS si aad uga qaybgasho baaritaanka xubinta taranka marka baaritaankaaga xiga la gaaro.**

## Maxaa ku dhici doona natiijooyinka daraasadda cilmi-baarista?

Waxaan natiijooyinka ka soo baxa daraasaddan u isticmaali doonaa inaan fahanno habka ugu wanaagsan ee qalabyada muunada la iskaga qaado loo gaarsiin karo haweenka ka soo daahay baaritaanka xubinta taranka dumarka ee jooga England. Waxaan sidoo kale rajeyneynaa inaan natiijooyinka ku daabacno joornaalada caafimaad si gacan looga geysto kordhinta wacyagelinta. Waxaan sidoo kale natiijooyinka daraasadda ku daabici doonnaa www.smallc.org.uk/youscreen. Haddii aad jeclaan lahayd inaad hesho nuqul ka mid ah natiijooyinka daraasadda, waxaad la xiriiri kartaa kooxda daraasadda adigoo isticmaalaya faahfaahinta xiriirka ee ku yaal dhammaadka buugyarahan.

## Sideed u isticmaali doontaa macluumaadka aad igu ururisaan aniga?

Dhammaan macluumaadka daraasadda ee aan kaa aruurinno waxay noqon doonaan kuwo qarsoon. Cilmi baarayaasha King's College London waxay heli doonaan oo keliya xog qarsoon si ay uga jawaabaan su'aalaha daraasadda. Xogtaadu waxay lahaan doontaa lambar koodh ah halkii magacaaga lagu qori lahaa oo kooxda daraasadduna ma awoodi doonaan inay kugu aqoonsadaan macluumaadka ay helayaan. Lambarka koodhka waxaa loo isticmaali doonaa in xiriir loogu sameeyo dhammaan macluumaadka si looga jawaabo su'aalaha daraasadda. Waxaan xogtaada si aamin ah ugu keydin doonaa King's College London.

Kooxda La-talinta Qarsoodiga Macluumaadka (CAG) waa hay'ad madax-bannaan oo bixisa talo khabiireed oo ku saabsan isticmaalka macluumaadka bukaanka ee qarsoodiga ah. Hay'adda Cilmi-baarista Cafimaadka (HRA), oo ay la talisay CAG, ayaa na siiyey taageeradooda si aan u ogaano ugana soo ururinno xogta haweenka u qalma daraasadda.

Haddii aad qalabkaaga ka heshay boostada, waxaan awoodnay inaan kugu aqoonsanno NHS iyo Hay'ada Caafimaadka Dadweynaha England si aan kuugu martiqaadno inaad kaqeybqaadato daraasadda. Si taas loo sameeyo, shaqaalaha NHS (kuwaas oo loo tixgeliyo inay ka mid yihiin kooxda daryeelkaaga tooska ah) waxay u gudbiyeen magacaaga, lambarka NHS-ta, taariikhda dhalashadaada, cinwaankaaga (oo ay ku jiraan lambarka boostada) iyo xarunta dhaqtarkaaga GP-ga waxay u gudbiyeen shirkada bixisa adeegga boostada (oo aah qollo 3aad). Shirkadda boostada ayaa abaabushay kuu soo dirista qalabka YouScreen. Shirkadda boostada waxay si joogto ah ula shaqeysaa NHS-ta waxaana waajib ku ah heshiisyo qandaraaseed. Waxay ku shaqeyn doonaan heerar amni oo adag si loo xaqiijiyo in macluumaadkaaga loogu hayo si qarsoodi ah oo xifdisan.

Markaad soo celiso muunadaada, waxaad u oggolaanaysaa kooxda daraasaddu inay soo ururiyaan macluumaad adiga kugu saabsan inta lagu jiro daraasadda. Xog uruurintani waxaa ku jiri doona natiijadaada muunada iyo natiijooyinka baaritaanka xubinta taranka dumarka ee ku xiga. Shaybaarka ayaa sidoo kale na siin doona macluumaad ku saabsan diiwaanka isbitaalka haddii aad u tagto isbitaalka deegaankaaga si aad u hesho baaritaanno dheeri ah oo lagu sameeynayo xubintaada daranka. Markaad soo celiso muunadaada, waxaad sidoo kale noo oggolaanaysaa inaanu waydiino xarunta diiwaanka kansarka qaranka wixii macluumaad ah ee la xiriira baadhitaanada qof kasta oo soo celiyo muunada 3 iyo 6 sano ka dib dhamaadka daraasada.

Oggolaanshahan ma daboolayso xog aruurinada kale inta lagu jiro daraasadda, tusaale ahaan diiwaanka GP-gaaga iyo keydka macluumaadka baaritaanka xubinta taranka dumarka ee qaranka. HRA waxay na siisay taageero aan ugu soo aruurinayno macluumaad qarsoodi ah diiwaanka GP-gaaga iyo keydka baaritaanka xubinta taranka dumarka ee qaranka, macluumaadkaas laga helayo dhamaan haweenka u qalma daraasadda si looga jawaabo su'aalaha daraasadda. Macluumaadkan waxaa la ururin doonaa muddada daraasadda oo dhan, illaa 18 bilood ka dib bilowga daraasadda. Waxaan ururin doonaa macluumaadkan qarsoodiga ah ee ku saabsan dhammaan haweenka u-qalma daraasadda, oo ay ku jiraan kuwa aan soo celin qalabka. Tani waxay ka dhigeysaa cilmi baaristeena mid waxtar leh waxayna ku siin doontaa macluumaad ku saabsan sida muunad iska qaadista loo istcimaali doono mustaqbalka. Macluumaadka aan soo aruurin doono waxaa ka mid ah da'daada, qowmiyadaada, aagaga xaafadaada guud, iyo faahfaahin ku saabsan baaritaanka xubinta taranka dumarka ee hore iyo mustaqbalka. Waxaan ururin doonnaa oo keliya macluumaadka la xiriira baaritaanka xubinta taranka dumarka iyo daraasadda (tusaale ahaan natiijooyinka baaritaannada xubinta taranka ee aad horey u soo martay ama laga yaabo inaad mustaqbalka samayso). Kuma xiriirin doono magacaaga ama faahfaahinta lagugu aqoonsan karo macluumaadkan.

**Haddii aadan rabin in macluumaadkaaga qarsoodiga nalala wadaago, waad ka bixi kartaa adigoo la xiriiraya xarunta GP-gaaga.**

Haddii aad na siiso oggolaanshaha ah inaan keydinno haraaga muunadaada, waxaan la shaqeyn doonaa wada-hawlgalayaashayada cilmi-baarista (oo xaruntoodu tahay UK) si aan u samayno cilmi-baaris dheeri ah oo gacan ka geysan karta kobcinta baaritaanka xubinta taranka dumarka mustaqbalka. Si arrintaan loo sameeyo, waxaan macluumaad qarsoodi ah oo adiga kugu saabsan la wadaagi doona iyaga si aan uga caawino cilmi baaristaan.

Macluumaadka aan ururinno waxaa loo isticmaali doonaa in lagu sameeyo cilmi baarista ama lagu hubiyo diiwaanadaada si loo hubiyo in baaritaanka si sax ah loo qabtay. Waxaan si amaan ah u ilaalin doonaa dhammaan macluumaadka adiga kugu saabsan.

Dhamaadka daraasada, waxaan hayn doonaa qaar ka mid ah xogta ilaa 5 sano lacala haddii ay dhacdo inaan u baahanahay inaan hubino ama aan ugu isticmaalno cilmi baaris mustaqbalka ah. Waxaan xaqiijin doonaa in warbixinnada aan qoreyno uusan qofna ka soo ogaan karin qofka aad tahay.

## Halkeen ka heli karaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida macluumaadkayga loo isticmaalayo?

Xogtaada waxaa looga shaqeyn doonaa si waafaqsan Xeerka Ilaalinta Xogta Guud 2016 (GDPR). Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida xogtaada looga shaqeeyo waxaa lagu heli karaa adigoo kala xiriiraya:

- www.hra.nhs.uk/information-about-patients/
- ee websaydhkeena: www.ucl.ac.uk/legal-services/privacy/participants- health-and-care-research-privacy-notice
- adigoo iimayl u diraya data-protection@ucl.ac.uk
- adigoo wacaya kooxda cilmi baarista 020 784 89703

Macluumaad dheeraad ah waxaa sidoo kale laga heli karaa:
www.hra.nhs.uk/patientdataandresearch

# Macluumaad Kale

## Yaa abaabulaya oo maalgelinaya daraasadda?

Hay'ada Isbahaysiga Kansarka ee Waqooyiga iyo Bartamaha London ayaa maalgalinaysa daraasadda YouScreen. Waxay taageero iyo ansixin ka haysataa Hay'ada NHS England ee Gobolka London iyo Hay'ada Caafimaadka Dadweynaha England.

University College London ee ayaa ah kafaalaqaadaha daraasadda iyo Kooxda Kahortagga Kansarka ee King's College London ayaa hogaaminaya cilmibaarista.

Madaxa Cilmi baarista waa Dr Anita Lim, King's College London.

## Yaa dib u eegis ku sameeyey daraasadda?

Guddiga Anshaxa Cilmi-baarista Qaranka - West Midlands - Guddiga Anshaxa Cilmi- baarista South Birmingham ayaa dib u eegis ku sameeyey oo ansixiyay daraasadda.

## Yaan la xiriiri karaa haddii aan wax walaac ah ama su'aalo ka qabo?

### Welwelka ama su'aalaha la xiriira caafimaadka

Haddii aad qabto wax welwel ah oo la xiriira caafimaadka ama wax su'aalo ah oo ku saabsan baaritaanka xubinta taranka dumarka, la xiriir GP-gaaga.

Haddii aad qabtid wax su'aalo ah oo ku saabsan iska qaadista muunada, ama aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah ama taageero, waxaad wici kartaa khadka taleefanka lacag la'aanta ah ee Hay'ada YouScreen Jo's Cervical Cancer Trust ka wac taleefanka
0808 801 0408 ama booqo www.jostrust.org.uk/

Waxaa jira sababo badan oo dumarka ugu adkaan karto inay aadaan baaritaanka xubinta taranka dumarka. Mutadawiciinta khadka caawinta ayaa si khaas ah loogu tababaray inay caawiyaan dadka u soo waca arrintan.

### Welwelka ama su'aalaha la xiriira daraasadda

Haddii aad ka walwalsan tahay dhinac kasta oo daraasaddan ah, waa inaad la hadashaa cilmi-baarayaasha kuwaas oo ku dadaali doona inay ka jawaabaan su'aalahaaga.

Madaxa Baaraha: Dr Anita Lim, King's College London
Iimaylka: youscreen-questions@kcl.ac.uk

Taleefanka: 020 784 89703

Haddii aadan weli faraxsanayn oo aad rabto inaad cabasho rasmi ah gudbiso, waxaad sidaas samayn kartaa adigoo la xiriiraya Adeegga Talobixinta Bukaanka iyo Xiriirinta (PALS)

Boostada: PALS Office Ground Floor
University College Hospital
235 Euston Road London NW1 2BU

Iimayl ahaan: UCLH.pals@nhs.net

Taleefanka: 020 3447 3042

## For more information in other languages please visit: www.smallc.org.uk/youscreen

| | |
|---|---|
| **Arabic** | للمزيد من المعلومات بلغات أخرى، يرجى زيارة الموقع: www.smallc.org.uk/youscreen |
| **Bengali** | অন্যান্য ভাষাতে আরো তথ্যের জন্য অনুগ্রহ করে দেখুন: www.smallc.org.uk/youscreen |
| **Chinese** | 如需其他语种的更多信息，请访问： www.smallc.org.uk/youscreen |
| **French** | Pour plus de renseignements dans d’autres langues, rendez-vous sur : www.smallc.org.uk/youscreen |
| **Greek** | Για περισσότερες πληροφορίες σε άλλες γλώσσες, επισκεφθείτε την ιστοσελίδα: www.smallc.org.uk/youscreen |
| **Hebrew** | למידע נוסף בשפות אחרות, בקר בכתובת: www.smallc.org.uk/youscreen |
| **Polish** | W celu uzyskania informacji w innych językach prosimy o odwiedzenie strony: www.smallc.org.uk/youscreen |
| **Portuguese** | Para mais informações em outros idiomas, visite www.smallc.org.uk/youscreen |
| **Punjabi** | ਹੋਰ ਭਾਸ਼ਾਵਾਂ ਵਿੱਚ ਵਧੇਰੇ ਜਾਣਕਾਰੀ ਲਈ ਕਿਰਪਾ ਕਰਕੇ ਇਸ ਵੈੱਬਸਾਈਟ 'ਤੇ ਜਾਓ: www.smallc.org.uk/youscreen |
| **Russian** | Для детальной информации на других языках, пройдите, пожалуйста, по ссылке: www.smallc.org.uk/youscreen |
| **Somali** | Wixii xog dheeraad ah oo ku qoran luuqado kale fadlan booqo barta: www.smallc.org.uk/youscreen |
| **Spanish** | Para obterner más información en otros idiomas consulte: www.smallc.org.uk/youscreen |
| **Swahili** | Ili upate maelezo zaidi kwa lugha nyingine tafadhali tembelea: www.smallc.org.uk/youscreen |
| **Thai** | ดูข้อมูลเพิ่มเติมในภาษาอื่น ๆ ได้ที่ : www.smallc.org.uk/youscreen |
| **Turkish** | Diğer dillerde daha fazla bilgi almak için: www.smallc.org.uk/youscreen |

CANCER RESEARCH UK

KING'S COLLEGE LONDON CANCER PREVENTION TRIALS UNIT

Jo's cervical cancer trust

Public Health England